

Ku dhaqan Xafiis D.

Faafinta  
الرسمية  
Official



Rasmiga ah  
الجريدة  
Bulletin

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 11aad

Muqdisho, APRIL 2024

Lr. 2

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

### FAAFIN BILAHA SOO BAXA

Qiiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

### KOBNIIN

#### BOGGA KOOWAAD

#### SHARCI

W.M

#### BOGGA LABAAD

XEER

#### BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

### BILAHA

FEBRUARY-MARCH

2024



PXeer Ra'iisal Wasaare Lr. 154

Taariikh: 21/03/2024

**XEER: HABRAACA DIIWAANGALINTA IYO SUGIDDA MILKIYADDA  
GAADIIDKA DHULKA**

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;



- Markuu arkay:** Qodobka 97<sup>aad</sup> faqradda 1<sup>aad</sup> iyo 2<sup>aad</sup>; Qodobka 99<sup>aad</sup> faqraddaha (a), (b), (e), iyo (f); iyo Qodobka 100<sup>aad</sup> faqraddaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;
- Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay MTCA/OM/13/2024 ee ku taariikheysan 27/02/2024 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada;
- Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW09.66.03.24 ee 07/03/2024, kuna saabsan ansixinta **Habraaca Diiwaangalinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;
- Markuu tixgaliyay:** muhiimadda uu u leeyahay amniga Dalka Habraaca Diiwaangalinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka;

**Waxa uu Meelmariyay:**

**Qodobka 1<sup>aad</sup>:**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW09.66.03.24 ee 07/03/2024, kuna saabsan ansixinta **Habraaca Diiwaangalinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Oodobka 2<sup>aad</sup>

**Hirgalin**


Waxaa Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Habraaca Diiwaangalinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka.

Oodobka 3<sup>aad</sup>


**Dhaqangal**

Habraacani waxa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.



  
Mudane, Hamza Cabdi Bala  
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA	
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD	
DIWAAN NO:	HAN-28-2024
TAARIKH:	01-04-2024
SAXIIX:	
AVV Ahmed Ismael Gatale	
Hantidhowrka Guud Ee JFS	





SOMALI FEDERAL REPUBLIC

The Ministry of Transport and Civil Aviation

Office of The Minister

REF: MTCA/OM/231/2024

February 27, 2024

Ku: Ra'iisal Wasaaraha XFS

Og: Garyaqaanka Guud ee Dowladda

Og: Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka

Og: Agaasima Guud ee Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada

Og: Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada

Og: Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada

**Ujeedo: Soo gudbin Habraaca Diiwaan-Gelinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka**

Mudane Ra'iisal Wasaare

Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada XFS, waxay usoo gudbinaysaa Xafiiska Ra'iisul-Wasaaraha XFS Habraaca Diiwaan-Gelinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka Soomaaliya oo soo maray dhammaan habraacyadii iyo xeerarkii sharciga ahaa si uu dhaqngal unoqdo looguna soo gudbiyo Golaha Wasiirada.

Sidaas darteed, waxan kaa codsanaynaa Mudane Ra'iisul Wasaare in lagu daro habraacan ajandaha kulanka Maalinta Khamiista Taariikhduna ay tahay 29/02/2024, maadaama uu muhiim u yahay Dalka si Golaha Wasiiraddu ay uga qabsadaan shaqada uga aaddan.

Salaan iyo qadarin Mudane ra'iisul Wasaare.

Xil. Fardowsa Cismaan Cigaal


Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada



Shangani, Mogadisho-Somalia

Email: [fardowsa1@gmail.com](mailto:fardowsa1@gmail.com), [info@motca.gov.so](mailto:info@motca.gov.so), [minister@motca.gov.so](mailto:minister@motca.gov.so)

TEL: +252-907798745/+252-61444097



**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**WASAARADDA GAADIIDKA IYO DUULISTA HAWADA**

**HAB-RAACA DIIWAAN-GELINTA IYO SUGIDDAMILKIYADDA GAADIIDKA  
DHULKA**

**Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Gaadiid & Duulista Hawada 2024**



THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA  
OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL

Summad: XGG/053/2024

27/02/2024

**Ku: Agaasinka Golaha Wasiirrada**

**Muqdisho**

**Og: Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawada**

**Muqdisho**

**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS**

**Muqdisho**

**Ujeedo: Talo Sharci ku saabsan "HAB-RAACA DIIWAAN-GELINTA IYO SUGIDDA MILKIYADDA GAADIIDKA DHULKA"**

Xafiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tiixraacaya warqadda Summaddeedu tahay: **WC&AD/XAWSH&H/1103/2024** ee ku taarikheysan **25/02/2024** kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, ujeedadeeduna ahayd: **Soo gudbin "Hab-raaca Diiwaan-gelinta Iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka"**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci Lr. **18 ee 29 Jannaayo 1976**, ayaa waxa uu halkaan idinkugu soo gudbinayaa "Hab-raaca Diiwaan-gelinta Iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka" oo ay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, uguna bixiyo Talo Sharci.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka diib markii uu darsay Nuqulka Hab-raacani oo abuuraya hannaan lagu sugayo milkiyadda gaadiidka dhulka, laguna bixinayo summad (taargo) cusub ee gaadiidka kala duwan, uuna ku daray Ra'yigiisa iyo taladiisa Sharci. Xafiisku waxa uu ku talinayaa in la saxiixo Hab-raacani, maadaama aanay ka hor imaanayn dastuurka iyo shuruucda dalka, ka dib marka la dhammeystiro hab-raaca ansixinta.

FG: Waxa halkan ku lifaaqan Hab-raacani Sare ku xusan.

**Wabillahi Towfiiq**

**Avv. Xassan Axmed Caamir**

**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**





Federal Republic of Somalia  
Ministry of Justice and Constitutional Affairs  
Office of Director Legislation and Agreement Department

Summad: WC&AD/XAWSH&H/1103./2024

Tr. 25/02/2024

Mudane Garyaqaan,

**Ujeeddo: Soo-gudbin "Hab-raaca Diiwaan-gelinta Iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka"**


Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbinaysaa **Hab-raaca Diiwaan-gelinta & Sugidda Milkiyadda Gaadiidka Dhulka**, oo abuuraya hannaan lagu sugayo milkiyadda gaadiidka dhulka, laguna bixinayo summad (taargo) cusub ee gaadiidka kala duwan kuwa rayidka, ciidanka, ganacsiga, diblomasiiyinta, qaramada midoobay iyo kuwa gargaarka.

Hab-raacan oo ay diyaarisay **Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawada**, waxay Wasaaradda Cadaaladdu ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan hab-raacyada.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa inuu waajibkiisa sharci ee ku aaddan hab-raacan ka guto, si hab-raaca ansixintu u dhammeystirno.

Mahadsanidiin.

Mudane Xasan Axmed Cali  
Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,  
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka



XAFIISKA GARYAQAANKA  
GUUD EE DOWLADDA


**GALID**

Taariikh: 26/02/2024

Garyaqaanka Guud ee Dawladda

- Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka
- Og: Xoghayaha joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka
- Og: Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka
- Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka
- Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka

=Muqdisho=  
=Muqdisho=  
=Muqdisho=  
=Muqdisho=  
=Muqdisho=  
=Muqdisho=



**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**WASAARADDA GAADIIDKA IYO DUULISTA HAWADA**

**HAB-RAACA DIIWAAN-GELINTA IYO SUGIDDAMILKIYADDA GAADIIDKA  
DHULKA**

**Sharcigan waxaa laga soo xigtay  
Xeerka Gaadiidka Dalka ee soo baxay 2007**

**Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Gaadiid & Duulista Hawad 2024**



## **CUTUBKA 1AAD: HORDHAC**

### **Qodobka 1aad: Hordhac**

Dhammaan Gaadiidka ku sugan Dalka ama kuwa soo galaya, Gaadiidka Yar-yar Gaadiidka waaweyn, Gaadiidka Xamuulka, Gaadiidka Dowladda, Gaadiidka Ciidanka, Gaadiidka leh Taarikada Ganacsiga, Gaadiidka Safaaradaha, Gaadiidka Hay'adaha Caalamiga ah, Gaadiidka Gurmada Deg-dega, Gaadiidka Dab-damiska iyo Gaadiidka Mootooyinka noocadooda kala duwan - oo ay ku jiraan kuwii horey u joogay dalka iyo kuwa cusub ee ka soo dega Dekadaha, Garoomada diyaaradaha, ama ka soo galaya Xudduudaha Dalalka deriska nala ah- Waxaa lagu dhaqayaa Habraaca Diiwaan-gelinta iyo Sugidda Milkiyadda Gaadiidka kaas oo lagasoo xigtay Xeerka Gaadiidka Dalka ee soo baxay 2007.

### **Qodobka 2aad: Ujeeddo**

Ujeeddada habraacan waa in la xoojiyo lana casriyeeyo nidaamka qaadashada Dukumiinti-yada ay bixiso Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada, iyo in la dhaqan geliyo habraaca adeegyada Gaadiidka.

### **Qodobka 3aad: Habraaca Diiwaan Gelinta & Sugidda Milkiyadda Gaadiidka**

Habraacyadaan cusub ee Diiwaan gelinta gaadiidka iyo sugidda milkiyaddooda waxay suurta-gelinayaan in dhammaan Gaadiidku uu helo Sharciyad dhameystiran taas oo sare u qaadeysa Amniga iyo Dhaqaalaha Dalka.

**CUTUBKA 2AAD:**  
**HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA RAYIDKA**  
**NOOCYADIISA KALA DUWAN**

**Qodobka 4aad:**

**Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka Rayidka**

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka waxaa lagusoo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka, sida uu jideynayo habraacan - waana in khidmadda loo jideedayay ay la socotaa.
2. **Wasaaraddu**, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee Gaadiidka Rayidka, waxa ay hubin doontaa Faah-faahinta ku xusan Arjiga codsiga, haddii ay Wasaaraddu u aragto in gaariga aanu soo buuxin shuruudaha diiwaan gelinta, Wasaaradda waxa ay u direysaa in uu soo maro nidaamka tijaabada Bad-qabka Gaadiidka iyo hubinta Xadaynta Xamuulka.
3. Gaari walba ama Tareelle kasta waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshaha iyo Sumadda Taarikada Wasaaradda Gaadiidka.
4. Kaarka Lahaanshiyaha Gaadiidka waa in ay ku jirtaa dhammaan faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga, Aqoonsigiisa, Sanadka la sameeyay, nooca gaariga, midabka, VIN numberka iyo Tirada bustanka (cylinder motor).
5. Haddii ay timaaddo xaalad is beddel ah oo wax u dhimaysa saxnimada macluumaadka u diiwaangashan gaari kasta, qofka ama shirkada iska leh gaarigaas waa in ay ku wargelisaa Wasaaradda oo ay la wadaagtaa xaaladda isbeddelka soo cusboonaaday.
6. Qofka ama Shirkadda Magacooda iyo Xogtooda lagu diiwaan galiyay gaariga ayaa ah Milkiilaha, illaa iyo inta laga sameynayo kala wareejin sharci ah iyo Diiwaan gelin xogta Milkiilaha cusub.

## **Qodobka 5aad:**

### **Shuruudaha Diwaangelinta gaadiidka rayidka**

1. Waa in Arjiga codsiga diiwan-gelinta ay ku caddahay dhammaan Xogta Gaariga.
2. Milkiilaha waa in uu keenaa Kaarka Aqoonsiga Qaranka "National ID" ama Baasaboort "Passport" ama Laysinka Darawal-nimada, Haddii ay shirkadi leedahay Milkiyadda waa in ay keentaa Shatiga Shirkadda oo aan dhacsaneyn.
3. Waa in uu keenaa Shahaado caddeynaysa hawl galnimada gaadiidka oo ka soo baxday shirkadda soo saartay "Manufacturing Certificate"
4. Waa inuu keenaa Caddeynta Warqadda iibsiga Gaariga.
5. Shahaadada Bedqabka gaadiidka iyo waafaqsanaanta shuruudaha ilaalinta deegaanka.
6. Haddii Gaarigu yahay nooca aan Xabaddu karin "Bullet Proof" waa in Milkiilaha uu la yimaadaa Ogolaanshiyaha Wasaaradda Amniga.
7. Waa in Milkiilahu keenaa Warqadda Caddeynta Bixinta Canshuurta soo dejinta iyo Caddeynta bixinta khidmada loo jaangooyay adeega.

## **Qodobka 6aad:**

### **Bixinta Taarikada "Vehicle Plate" & Kaarka Caddeynta Milkiyadda Gaariga**

1. Marka uu Milkiilaha ama Shirkadda Gaadiidka iska leh ay soo buuxiyaan Shuruudaha Diiwaan-gelinta Gaadiidka Rayidka ee ku xusan Qodobka 5aad, Waxay Waaxda Diiwaan-gelinta Gaadiidka Rayidka "PRA" marsiineysaa Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka ee ku xusan Qodobka 4aad.
2. Dhameystirka Habraaca Diiwaan-gelinta Gaadiidka kadib, Waxaa loo gudbinayaa Marxaladda ugu danbeysa oo ah Daabacaadda, bixinta Taarikada & Kaarka Caddeynta Milkiyadda Gaariga.

## Qodobka 7aad: Muuqaalka & Naqshadda Taarikada Gaadiidka Rayidka

1. Muuqaalka iyo naqshadda taarikadda gaadiidka rayidka waa sida ku cad figure 1 - figure 6

Figure 1




Figure 2




Figure 3




Figure 4




Figure 5





Figure 6



## Qodobka 8aad:

### Muuqaalka & Naqshadda Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka Rayidka

1. Muuqaalka iyo naqshadda Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka waa sida ku cad Figure 7 – Figure 9

<p style="writing-mode: vertical-rl; transform: rotate(180deg);">Figure 7</p>	 <p>DOWLADDA FEDERALKA SOOMAALIYA WASAARADDA GAADIIDKA Kaarka Aqoonsiga Gaariga</p> <p>FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA MINISTRY OF TRANSPORT Vehicle Identification Card</p> <p>MAGACA MILKILAHA Owner's Name Bashir Moallim Ali Hassan</p> <p>ENGINE NUMBER 123456789 VIN KOD KRE57DVKN011DRS21AS BODY NUMBER F ALLOWED MAXIMUM WEIGHT, kg 2500 G NET WEIGHT OF VEHICLE, kg 1900 H SPECIAL REMARKS UNIVERSAL Issue Date: 15.02.2024</p> <p>MILKIYADDA GAARIGAAN WAXAA XAQIJIJISAY WASAARADDA GAADIIDKA</p>
<p style="writing-mode: vertical-rl; transform: rotate(180deg);">Figure 8</p>	 <p>REGISTRATION NUMBER AB80556G YEAR OF PRODUCTION 2021 ADDRESS MOGADISHU MARK TOYOTA CAMRY COLOR WHITE CHASSIS NUMBER AG ED5896J54 TM No: 1482576</p>
<p style="writing-mode: vertical-rl; transform: rotate(180deg);">Figure 9</p>	 <p>DOWLADDA FEDERALKA SOOMAALIYA WASAARADDA GAADIIDKA Kaarka Aqoonsiga Gaariga</p> <p>FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA MINISTRY OF TRANSPORT Vehicle Identification Card</p> <p>(UV light)</p> <p>MILKIYADDA GAARIGAAN WAXAA XAQIJIJISAY WASAARADDA GAADIIDKA</p>

**CUTUBKA 3AAD:**  
**HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA XAMUULKA**

**Qodobka 9aad:**  
**Shuruudaha Diwaangelinta gaadiidka Xamuulka am Tareelle**

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka waxaa lagusoo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka, sida uu jideynayo habraacan - waana in khidmadda loo jideedayay ay la socotaa.
2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee Gaadiidka, waxa ay hubin doontaa Caddeynta ujeeddada iyo baahida loo qabo gaadiidkaas.
3. Waa in Arjiga codsiga diiwan-gelinta ay ku caddahay dhammaan Xogta Gaariga.
4. Milkiilaha waa in uu keena Kaarka Aqoonsiga Qaranka "National ID" ama Baasaboort "Passport" ama Laysinka Darawal-nimada, Haddii ay shirkadi leedahay Milkiyadda waa in ay keentaa Shatiga Shirkadda oo aan dhacsaneyn.
5. Milkiiluhu waa in uu keena Shahaado caddeynaysa hawl galnimada Gaadiidka oo ka soo baxday shirkadda soo saartay "Manufacturing Certificate"
6. Milkiiluhu waa inuu keena Caddeynta Warqadda iibsiga Gaariga.
7. Shahaadada Bedqabka gaadiidka iyo waafaqsanaanta shuruudaha ilaalinta deegaanka.
8. Warqadda sugitaanka milkiyadda oo ka soo baxday Maxkamad ama Nootaayo sharci ah.
9. Waa in Milkiilahu keena Warqadda Caddeynta Bixinta Canshuurta soo dejinta iyo Caddeynta bixinta khidmada loo jaangooyay adeega.



**Qodobka 10aad:**  
**Kaarka Lahaanshaha & Taarikada Gaadiidka Xamuulka ama Tareellaha**

1. Marka uu Milkiilaha ama Shirkadda Gaadiidka iska leh ay soo buuxiyaan Shuruudaha Diiwaan-gelinta Gaadiidka Rayidka ee ku xusan Xarafka "B" Waxay Waaxda Diiwaan-gelinta Gaadiidka Rayidka "PRA" marsiineysaa Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka ee ku xusan Xarafka "A"
2. Dhameystirka Habraaca Diiwaan-gelinta Gaadiidka kadib, Waxaa loo gudbinayaa Marxaladda ugu danbeysa oo ah Daabacaadda, bixinta Taarikada & Kaarka Caddeynta Milkiyadda Gaariga.
3. Muuqaalka kaarka lahaanshiyaha iyo Taarikada gaadiidka Xamuulka ama Tareellaha waxa ay lamid noqon doonaan nooca Gaadiidka Rayidka, hadii loo baahdana waxaa lagu dari karaa Macluumaad dheeraad ee gaarigu leeyahay.

**CUTUBKA 4AAD:**  
**HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA DOWLADA "GD"**

**Qodobka 11aad:**  
**Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka Dowladda**

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka Dowladda waxaa lagusoo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka, sida uu jideynayo habraacan - khidmadda Gaadiidka Dowladda waxa ay noqoneysaa kaliya bixinta qiimaha Agabka, waxaana lagu dhaqayaa xeer iyo System Diiwaan-gelineed oo u gaar ah.
2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee gaadiidka Dowladda, waxa ay hubin doontaa ujeeddada iyo baahida loo qabo gaadiidkaas in uu yahay mid u qalma isticmaalka hay'adaas.
3. Habraacan waxa uu Hay'adaha Dowlada ku waajibinayaa in Dekaddaha Dalka aanu kasoo bixi karin Gaadiid Dowladeed oo aan diiwaan-geshaneyn ama aan wadanin Taariko Dowladeed.
4. Habraacan waxa uu farayaa Dhamaan Hay'addaha Dowladda Federalka iyo

Dowlad Gobaleed-yada inay soo diiwaan geliyaan Gaadiidka Dowladeed ee Gacantooda ku jira.

5. Habraacan waxa uu Gaadiidka Dowladeed ee aan diiwaan-geshaneyn u aqoonsanayaa mid lagu isticmaalayo Sharci darro, Mas'uuliyadda ka dhalatana waxaa qaadaya cidda aan u hoggaansamin Sharciga.
6. Gaari walba oo Dowladeed waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshiyaha Hay'adda Dowladeed ee loogu talagalay Isticmaalkiisa iyo Sumada Taarikada Gaadiidka Dowladda "GD"
7. Kaarka Lahaanshiyaha Gaadiidka waa in ay ku jirtaa dhammaan faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga dowladda, aqoonsigiisa, sanadka la sameeyay, nooca gaadiidka, midabka iyo VIN numbera tirada bustanka (cylinder motor) iyo xogta Wakiilka Hay'adda Gaariga ugu qoran.
8. Haddii ay dhacdo xaalad is beddel ah oo wax u dhimaysa saxnimada macluumaadka ku diiwaangashan Gaari kasta, hay'adda gaariga ku qoran waa in ay ku wargelisaa wasaaradda isbeddelkaas oo ay u soo gudbiyaan wasaaradda.
9. Hay'adda Magaceeda lagu diiwaan galiyay gaariga ayaa ah Milkiilaha gaariga, haddii aanay si sharci ah ugu wareejin Hay'ad kale oo Dowladeed.
10. Kala wareejinta Gaadiidka Dowladda ee Hay'adaha dhaxdooda ah waxa ay yeelaneysaa Habraac kala wareejin iyo Shuruudo u gaar ah.

### **Qodobka 12aad:**

#### **Shuruudaha Diiwaan gelinta gaadiidka Dowlada**

1. Waa in ay keenaan; Arjiga codsiga Hay'adda Dowladeed ee iska leh Gaadiidka iyo Caddeynta Milkiyadda.
2. Waa in Hay'adda Dowladeed ee loo diiwaan gelinayo Gaadiidka ay keentaa Warbixinta Gaariga la diiwaan-gelinayo iyo Ujeeddada Isticmaalka Gaariga.
3. Waa in Hay'adda Dowladeed ay keentaa Caddeymaha Iibsiga, Deeqaha Dowladaha kale iyo Warqadaha Canshuur dhaaf-ka.

### **Qodobka 13aad:**

#### **Soo saarista Kaarka Lahaanshaha & Taarikada Gaadiidka "GD"**

1. Marka ay Hay'ad Dowladeed soo buuxiso Shuruudaha Diiwaan-gelinta Gaadiidka Dowladda, Waxa ay Waaxda Diiwaan-gelinta Gaadiidka Dowladda "GD" u diiwaan-gelineysaa si waafaqsan Sharciga.
2. Dhameystirka Habraaca Diiwaan-gelinta Gaadiidka kadib, Waxaa loo gudbinayaa Marxaladda ugu danbeysa oo ah Daabacaadda, bixinta Taarikada & Kaarka Caddeynta Milkiyadda Gaariga .
3. Muuqaalka kaarka lahaanshiyaha iyo Taarikada gaadiidka Dowladda waxa uu noqon doonaa mid ay ku dhameystiran tahay Xogta Gaariga.

### **CUTUBKA 5AAD:**

#### **HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA CIIDANKA**

### **Qodobka 14aad:**

#### **Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka Dowladda ee Ciidamada**

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka Ciidanka waxaa lagusoo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka, sida uu jideynayo habraacan - khidmadda Gaadiidka Ciidanka waxa ay noqoneysaa kaliya bixinta qiimaha Agabka, Waxaana lagu dhaqayaa xeer iyo System Diiwaan-gelineed oo u gaar ah.
2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee gaadiidka Ciidanka, waxa ay hubinaysaa ujeeddada iyo baahida loo qabo gaadiidkaas iyo in uu yahay mid u qalma isticmaalka hay'adaha.
3. Habraacan waxa uu Hay'adaha Ciidanka ku waajibinayaa in Dekaddaha Dalka aanu kasoo bixi karin Gaadiid Ciidan oo aan diiwaan-geshaneyn ama Taarko Ciidan aan wadanin.
4. Habraacan waxa uu farayaa Dhamaan Hay'addaha Ciidanka Heer Federaal iyo Heer Dowlad-Gobaleed-ba inay soo diiwaan geliyaan Gaadiidka Ciidan ee Gacantooda ku jira.
5. Habraacan waxa uu Gaadiidka Ciidan ee aan diiwaan-geshaneyn u

aqoonsanayaa mid lagu isticmaalayo Sharci darro, Mas'uuliyadda ka dhalatana waxaa qaadaya cidda aan u hoggaansamin Sharciga.

6. Gaari walba oo Ciidan waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshaha Hay'adda Ciidan ee loogu talagalay Istimalkiisa iyo Sumada Taarikada Gaadiidka Ciidan.
7. Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka Ciidan waa in ay ku jirtaa dhammaan faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga Ciidanka, aqoonsigiisa, sanadka la sameeyay, nooca Gaadiidka, Midabka iyo VIN numberka tirada bustanka (cylinder motor) iyo xogta Wakiilka Hay'adda Gaariga ugu qoran.
8. Haddii ay dhacdo xaalad is beddel ah oo wax u dhimaysa saxnimada macluumaadka ku diiwaangashan gaari kasta, hay'adda gaariga ku qoran waa in ay ku wargelisaa wasaaradda.
9. Hay'adda ciidan ee magaceeda lagu diiwaan galiyay gaariga ayaa ah Milkiilaha gaariga, haddii aanay si sharci ah ugu wareejin Hay'ad kale oo ciidan.
10. Kala wareejinta Gaadiidka Ciidan ee Hay'adaha ciidanka dhaxdooda ah waxa uu yeelanayaa Habraac kala wareejin iyo Shuruudo u gaar ah.

### **Qodobka 15aad:**

#### **Shuruudaha diiwaan gelinta Gaadiidka Ciidanka**

1. Hay'adaha Ciidanka waa in ay keenaan; codsiga Hay'adda Ciidan ee iska leh Gaadiidka iyo Caddeynta Milkiyadda.
2. Waa in Hay'adda Ciidan ee loo diiwaan gelinayo Gaadiidka ay keentaa Warbixinta Gaariga la diiwaan-gelinayo iyo Ujeeddada Istimalkiisa.
3. Waa in Hay'adda Ciidan ay keentaa Caddeymaha Iibsiga, Deeqaha Dowladaha kale iyo Warqadaha Canshuur dhaaf-ka.

### Qodobka 16aad:

#### Soo saarista Kaarka Lahaanshiyaha & Taarikada Gaadiidka

1. Marka ay Hay'adda Ciidan ee Gaadiidka iska leh ay soo buuxiso Shuruudaha Diiwaan-gelinta Gaadiidka Ciidanka , Waxa ay Waaxda Diiwaan-gelinta Gaadiidka Dowladda "GD" u diiwaan-gelineysaa si waafaqsan Sharciga.
2. Dhameystirka Habraaca Diiwaan-gelinta Gaadiidka Ciidanka kadib, Waxaa loo gudbinayaa Marxaladda ugu danbeysa oo ah Daabacaadda, bixinta Taarikada & Kaarka Caddeynta Milkiyadda Gaariga .

### Qodobka 17aad:

#### Muuqaalka & Naqshadda Taarikada Ciidanka

1. Muuqaalka iyo naqshadda taarikada gaadiidka ciidanka waa sida ku cad tusaalaha figure 10 & figure 11




Figure 11



**CUTUBKA 6AAD:  
HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA GANACSIGA**

**Qodobka 18aad:  
Hanaanka qaadashada Taariko Ganacsi**

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka Ganacsiga waxaa lagu hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka, sida uu jideynayo habraacan - khidmadda Gaadiidka Ganacsiga waxa ay 30% ka yar tahay Khidmadda loo jideedayay Gaadiidka Rayidka, waxaana Taarikada Ganacsiga la isticmaali karaa Hal mar oo kaliya "One time use",
2. kadib marka Ganacsadaha laga iibsado Gaariga oo uu sifo sharci ah ku wareejiyo Gaariga Milkiyaddiisa, Wasaaradda ayaa u sameyneysa kala wareejin iyo Hab-Diiwaan-gelin Dhameystiran.
3. Milkiilaha Cusub ee soo iibsaday Gaariga waxa uu qaadanayaa Taarikada Gaadiidka Rayidka isagoo bixinayaa khidmadda loo jideeyay.
4. Wasaaraddu, waxa ay burburineysaa/Baabi'ineysaa Taarikada Ganacsi ee

kumaal-gaarka ahayd, iyadoo System-ka Diiwaangelinta lagu keydinayo xogteeda iyo xogta taarikada cusub ee lagu badalay.

5. Gaadiidka Marka uu ka soo dego Dekadaha Dalka, Shirkadda Ganacsi ee soo degsatay gaadiidka waxa ay Wasaaradda usoo gudbineysaa warqad Tiimbareysan oo ay ku cadahay xogta Gaariga oo dhamaystiran.
6. Shirkadda Ganacsi ee soo dejisay gaadiidka waxaa laga doonayaa inay keento Caddeymaha Bixinta Canshuurta soo dejinta, iyo Caddeynta bixinta khidmada loo jaangooyay adeega.

**Qodobka 19aad:**  
**Soo saarista Buugga Lahaanshiyaha & Taarikada Gaadiidka Ganacsiga**

1. Gaadiidka Ganacsiga waxaa loo sameynayaa Taariko KMG ah, Dhammaan Xogta Gaariga waxaa lagu qorayaa Buuga Milkyadda.
2. Shaxda, naqshadda taarikada gaadiidka ganacsiga waa sida ku cad tusaalaha figure 12



**CUTUBKA 7AAD:  
HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA  
DIPLOMAASIYIINTA "DIPLOMATS"**

**Qodobka 20aad:**

**Hanaanka Diiwaan gelinta Gaadiidka Diplomaasiga ama Safaaradaha**

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka Diplomaasiga ama Safaaradaha waxaa lagusoo hagaajinayaa Wasaaradda Arimaha Dibadda, kadib waxay u soo gudbinaysaa Wasaarada Gaadiidka Marka codsiga uu soo gaaro Wasaarada waxa ay marineysaa Habraaca Diiwaangelinta Gaadiidka Diplomaasiga sida uu jideynayo habraacan, khidmadda Gaadiidka Diplomaasiga waxa ay noqoneysaa kaliya bixinta qiimaha Agabka.
2. Diiwaan-gelinta Gaadiidka Diplomasiga, waxa ay noqoneysaa kaliya bixinta qiimaha Agabka, sida uu jideynayo Habraacan.
4. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin gaadiidka Diplomacy-ga ama Safaaradaha Waxa ay hubinaysaa ujeeddada iyo baahida loo qabo isticmaalka Gaadiidkaas.
5. Gaari walba oo Safaaradeed waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshiyaha iyo Sumada Taarikada Diplomaasiga "CD".
6. Kaarka Lahaanshiyaha Gaadiidka waa in ay ku jirtaa dhammaan Faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga, sida Aqoonsiga, Sanadka la sameeyay, Nooca Gaadiidka, Midabka iyo VIN number-ka, Tirada bustinka (cylinder motor) iyo xogta darawalka gaariga ku qoran.



**Qodobka 21aad:  
Muuqaalka & Naqshadda Taarikada Gaadiidka  
Diplomaasiga/ Safaaradaha**

1. Muuqaalka iyo naqshadda taarikada gaadiidka diplomaasiga / safaaradaha waa sida ka cad figure 13



Figure 13


**CUTUBKA 8AAD:  
HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA HAY'ADAHA  
UN- Ka "UNITED NATIONS"**

**Qodobka 22aad:  
Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka Qaramada Midoobay**

1. Codsiga Diiwaan gelinta Gaadiidka Qaramada Midoobay ama UN -ka waxaa lagu soo hagaajinayaa Wasaaradda Arimaha Dibadda, kadib waxay u soo gudbinaysaa Wasaarada Gaadiidka, Marka codsiga uu soo gaaro Wasaarada waxa ay marineysaa Habraaca Diiwaan-gelinta Gaadiidka UN -ka sida uu jideynayo habraacan, khidmadda Gaadiidka UN-ka waxa ay noqoneysaa

kaliya bixinta qiimaha Agabka.

2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee gaadiidka ee Qaramada Midoobay, waxa ay hubinaysaa ujeeddada iyo baahida loo qabo nooca Gaadiidkaas.
3. Gaari walba oo Qaramada Midoobay ay leeyihiin waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshiyaha iyo Sumada Taarikada UN-ka
4. Kaarka Lahaanshiyaha Gaadiidka waa in ay ku jirtaa dhammaan Faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga, sida Aqoonsiga ,Sanadka la sameeyay, Nooca Gaadiidka, Midabka iyo VIN number-ka, Tirada bustinka (cylinder motor) iyo xogta darawalka gaariga ku qoran.
5. Muuqaalka iyo nashqadda taarikada gaadiidka un-ka waa sida ku cad figure 14



**CUTUBKA 9AAD:**  
**HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA MASHAARIICDA**  
**“GM”**

**Qodobka 23aad:**


**Habka Diiwaan-gelinta Gaadiidka Mashaariicda**

1. Codsiga Diiwaan gelinta gaadiidka Mashaariicda waxaa lagu soo hagaajinayaa Wasaaradda Arimaha Dibada, kadib waxay u soo gudbinaysaa Wasaarada Gaadiidka marka codsiga uu soo gaaro Wasaarada waxa la raacayaa sida uu jideynayo habraacan, waana in khidmadda la jideeyay ay la socotaa.
2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee Gaadiidka Mashaariicda, waxa ay xaqiijineysaa.
  - Macluumaadka mashruuca iyo hay'adaha Maalgeliya.
  - Bixinta diiwaan gelin gaar ah oo ku xiran nooca Mashruuca.
  - La socodka iyo qiimeynta isticmaalka Gaadiidka ee Mashruuca.
3. Gaari walba oo ka mid ah Gaadiidka Mashaariicda waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshiyaha iyo Sumada Taarikada Gaadiidka Mashaariicda “GM”
4. Kaarka Lahaanshiyaha Gaadiidka waa in ay ku jirtaa dhammaan Faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga, sida Aqoonsiga ,Sanadka la sameeyay, Nooca Gaadiidka, Midabka iyo VIN number-ka, Tirada bustinka (cylinder motor) iyo xogta darawalka gaariga ku qoran.

**Qodobka 24aad:**  
**Soo saarista Kaarka Lahaanshiyaha & Taarikada Gaadiidka**  
**Mashaariicda "GM"**

1. Muuqaalka iyo nashqadda taarikada gaadiidka mashaariicda waa sida ku cad figure 15

Figure 15



**CUTUBKA 10AAD:**  
**HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA GARGAARKA**

**Qodobka 25aad:**

**Hab raaca Diiwaan-gelinta Gaadiidka Gargaarka**

1. Codsiga Diiwaan gelinta gawaarida gargaarka waxaa lagu soo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka sida uu jideynayo habraacan, waana in khidmadda la jideeyay ay la socotaa.
2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee Gaadiidka Gargaarka, waxa ay hubinaysaa Ujeeddada iyo baahida loo qabo isticmaalka Gaadiidkaas.

**Qodobka 26aad:**  
**Shuruudaha Hay'adaha Gar-gaarka, kuwa Dowliga ah iyo kuwa aan**  
**Dowliga ahayn**

1. Dukumentiyada Aqoonsiga hay'adda Gargaarka Deg-degga ah sida Shahaaddooyinka Asaasiga ah, iyo caddeymaha inay yihiin Hay'ad sharci ah oo haysata Rukhsadda bixinta Adeeg-yada Gargaarka Deg-degga ah.
2. Qalabka lagama-maarmaanka u ah arrimaha Gar-gaarka Deg-degga, sida Qalabka Caafimaadka, Isgaarsiinta deg-degga, Iyo qalabka samata bixinta.
3. Noocyada gaadiidka gurmada ee laga oggol yahay Dalka, Cabbirka, iyo awoodda xamuulka.
4. Calaamadeynta Gaadiidka, iyo Astamaha muujinaya in gaadiidku yahay mid loogu tala galay Gar-gaarka deg-degga, sida midabka iyo astaamaha gaarka ah.
5. Gaari walba oo ka mid ah Gaadiidka gar-gaarka waa in uu yahay mid diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshaha iyo Sumada Taarikada Gar-gaarka Deg-degga ah, taas oo noqon karta Gaadiidka UMBLANCE ama Deb-damiska IWM.
6. Kaarka Lahaanshiyaha Gaadiidka waa in ay ku jirtaa dhammaan Faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta gaariga, sida Aqoonsiga ,Sanadka la sameeyay, Nooca Gaadiidka, Midabka iyo VIN number-ka, Tirada bustinka (cylinder motor) iyo xogta darawalka gaariga ku qoran.

**Qodobka 27aad:**  
**Soo saarista Kaarka Lahaanshiyaha & Taarikada Gaadiidka Gar-**  
**gaarka Deg-degga**

1. Muuqaalka iyo nashqadda taarikada gaadiidka gargaarka deg-degga waa sida ku cad figure 16 - figure 17

Figure 16



Figure 17



**CUTUBKA 11AAD:**  
**HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA MOOTADA**  
**BAJAAJ & MOOTO SADDEX LUGLEYDA**

**Qodobka 28aad:**

**Hanaanka Diiwaan gelinta Gaadiidka Mooto Bajaajta & Mooto**  
**Saddex Lugleyda**

1. Codsiga Diiwaan gelinta Mooto Bajaajta & Mooto Saddex lugleyda, waxaa lagu soo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka sida uu jideynayo habraacan, waana in khidmadda la jideeyay ay la socotaa. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala gadisan ee mootooyinka, waxa ay hubinaysaa Ujeeddada iyo baahida loo qabo Mootadaas.
2. Shirkadaha ka Ganacsada Mootooyinka noocyadooda kala duwan waxaa laga doonayaa Shuruudaha soo socda:
  - A. Arjiga codsadhaha oo ay ku caddahay macluumaadka Mootada
  - B. Aqoonsiga Milkiilaha sida; National ID-ga ama Baasaboorka, Laysin ama Shatiga shirkadda leedahay oo aan dhacsaneyn.
  - C. Shahaado caddeynaysa hawl galnimada Gaadiidka Mootada kaas oo kasoo baxday shirkadda soo saartay.
  - D. Shahaadada Bedqabka gaadiidka iyo waafaqsanaanta shuruudaha ilaalinta deegaanka.
  - E. Warqadda sugitaanka Milkiyadda oo ka soo baxday Maxkamad ama Nootaayo sharci ah.
  - F. Bixinta khidmadda loo jaangooyay adeega.
3. Mooto Bajaaj ama Mooto Saddex Lugleyda walba oo ka mid ah mootooyinka ka howl gala Dalka waa in ay yihiin kuwo ka diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshaha iyo Sumada Taarikada Mootada.
4. Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka Mootada waa in ay ku jirtaa dhammaan Faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta Mootada, sida Aqoonsiga ,Sanadka la sameeyay, Nooca Gaadiidka, Midabka iyo VIN number-ka, Tirada bustinka (cylinder motor) iyo xogta darawalka gaariga ku qoran.

**Qodobka 29aad:**  
**Soo saarista Kaarka Lahaanshiyaha & Taarikada Mooto Bajaajta ama Saddex Lugleyda**

1. Shaxda, naqshadda taarikada gaadiidka mooto 3 lugleyda waa sida ku cad figure 18 - figure 23





Figure 20




Figure 21




Figure 22





Figure 23



**CUTUBKA 12AAD:**  
**HABRAACA DIIWAAN GELINTA GAADIIDKA MOOTADA LABO**  
**LUGLEYDA**

**Qodobka 30aad:**

**Hanaanka Diiwaan gelinta Gaadiidka Mooto 2 Lugleyda**

1. Codsiga Diiwaan-gelinta mooto 2 Lugleyda ah waxaa lagu soo hagaajinayaa Wasaaradda Gaadiidka sida uu jideynayo habraacan, waana in khidmadda la jideeyay ay la socotaa.
2. Wasaaraddu, ka hor inta aanay diiwaan-gelin noocyada kala duwan ee mootooyinka 2 Lugleyda ah waxa ay hubinaysaa ujeeddada iyo baahida loo qabo Mootadaas.
3. Shirkadaha ka Ganacsada Mootooyinka noocyadooda kala duwan waxaa laga doonayaa Shuruudaha soo socda:
  - A. Arjiga codsadhaha oo ay ku caddahay Macluumaadka Mootada
  - B. Aqoonsiga Milkiilaha sida; National ID-ga ama Baasaboorka, Laysin ama Shatiga shirkadda leedahay oo aan dhacsaneyn.
  - C. Shahaado caddeynaysa hawl galnimada Mooto 2 lugleyda ah taas oo ka soo baxday shirkadda soo saartay.
  - D. Shahaadada Bedqabka Mootada iyo waafaqsanaanta shuruudaha ilaalinta deegaanka.
  - E. Warqadda sugitaanka milkiyadda oo ka soo baxday Maxkamad ama Nootaayo sharci ah.
  - F. Bixinta khidmada loo jaangooyay adeega.
4. Mooto 2 lugoodlay walba oo ka mid ah Mootooyinka ka howl gala Dalka waa in ay yihiin kuwo ka diiwaan-gashan oo haysta Kaarka Lahaanshaha iyo Sumada Taarikada Mootada.
5. Kaarka Lahaanshiyaha Mootada waa in ay ku jirtaa dhammaan Faahfaahinta xogta la xiriirta diiwaan-gelinta Mootada, sida Aqoonsiga ,Sanadka la sameeyay, Nooca Mootada, Midabka iyo VIN number-ka, Tirada bustinka (cylinder motor) iyo xogta darawalka Mootada ku qoran.

## Qodobka 31aad:

### Soo saarista Kaarka Lahaanshaha & Taarikada Mooto 2 lugoodlayda

1. Muuqaalka iyo naqshadda taarikada gaadiidka mooto 2 lugleyda waa sida ku cad figure 24 – figure 29

Figure 24




Figure 25



Figure 26




Figure 27




Figure 28





Figure 29



**CUTUBKA 13AAD:**  
**Cusbooneysiinta Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka**

**Qodobka 32aad:**  
**Cusbooneysiinta Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka**

1. Kaarka Lahaanshaha Gaadiidka waxaa la cusbooneysiin karaa marka ay timaado saddex xaaladood mid"
  - a. Haddii uu lumo ama ciladoobo.
  - b. Haddii ay jirto marxaladda ku xusan Qodobka 4aad (5),(6) mid kood.
  - c. Iyo mar kasta uu maro tijaabada bedqabka gaadiidka oo la sameeyo sannadkiiba hal mar.

**CUTUBKA 14AAD:**  
**Tariifada Khidmadda Gaadiidka Rayidka iyo Mootooyinka**

**Qodobka 33aad:**  
**Noocyada Taariifada**

Dhammaan, noocyada kal duwan ee Gaadiidka Rayidka iyo Mootooyinka, waxa ay Dowladda Soomaaliya u sameysay Tariifo khidmad laga qaadayo adeegyada bixinta Taarikada iyo Kaarka lahaanshaha Gadiidka, Sida uu jideynayo habraaca diiwan-gelinta iyo sugida milkiyada Gadiidka.

Haddaba; iyadoo Wasaaradda Gaadiidka ay ka duuleyso horumarinta iyo casriyeenta adeeg-yada Gaadiidka iyo sare u qaadista dakhliga dowladda, waxa ay Wasaraddu dib u diiwaan-gelin cusub ku sameyneysaa Dhammaan Gaadiidka Dalka iyadoo wasaaraddu ay bixineyso noocyo cusub oo Taariko casri ah iyo Kaarka lahaanshaha Gaadiidka.

**Qodobka 34aad:**  
**Noocyada Gaadiidka Rayidka & Mootooyinka**

- Taarikada Gaadiidka Rayidka & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Mooto 3 lugleyda & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Mooto 2 Lugleyda & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Gaadiid Rimoorka & Kaarka lahaanshaha

## SHAXDA KHIDMADA GAADIIDKA RAYIDKA & MOOTOOYINKA

S/N	Magaca Tariifada	Khidmadi loo jideeyay
1	Taarikada Gaadiidka Rayidka & Kaarka lahaanshaha Gaadiidka	\$138
2	Taarikada Mooto 3 lugleyda & Kaarka lahaanshaha Mootada	\$90.5
3	Taarikada Mooto 2 Lugleyda & Kaarka lahaanshaha Mootada	\$72.5
4	Taarikada Gaadiidka Rimoorka & Kaarka lahaanshaha Rimoorka	\$94.5
5.	Taarikada Gaadiidka Ganacsiga & Kaarka lahaanshaha	\$0.00
6.	Taarikada Gaadiidka Mashaariicda & Kaarka lahaanshaha	Waxaa lagu jaan- goynayaa qiimaha Mashruuca

### Qodobka 35aad:

#### KHIDMADA NOOCYADA GAADIIDKA AAN RAYIDKA AHAYN

Dhammaan, noocyada kal duwan ee Gaadiidka aan Rayidka aheyn, malahan wax Tariifo ah mana jirto wax khidmad ah oo Dowladda ay ka qaadeyso.

Bixinta adeegyada Taarikada iyo Kaarka lahaanshaha Gadiidka aan Rayidka ahayn waxaa ku waajibaya kaliya bixinta qiimaha Agabka, Sida uu jideynayo habraaca diiwan-gelinta iyo sugida milkiyada Gadiidka aan Rayidka ahayn.

Haddaba; iyadoo Wasaaradda Gaadiidka ay ka duuleyso horumarinta iyo casriyeenta adeeg-yada Gaadiidka iyo sare u qaadista dakhliga dowladda, waxa ay Wasaraddu dib u diiwaan-gelin cusub ku sameyneysaa Dhammaan Gaadiidka Dalka iyadoo wasaaraddu ay bixineyso noocyo cusub oo Taariko casri ah iyo Kaarka lahaanshaha Gaadiidka.



### Noocyada Gaadiidka aan Rayidka ahayn

- Taarikada Gaadiidka Dowladda & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Gaadiidka Ciidanka & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Gaadiidka Diplomacy-ga & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Gaadiidka UN-ka & Kaarka lahaanshaha
- Taarikada Gaadiidka Gargaarka & Kaarka lahaanshaha

# Dhammaad